# Bedelida ama Cusboonaysiinta Kaarkaaga Deganaanshaha Rasmiga ah ("Green Card")

Replacing or Renewing Your Permanent Resident Card ("Green Card")

! Qaar badan oo ka mid ah foomamka USCIS waa ay isbedelayaan iminka! Ka eeg shabakada (USCIS website) si aad u hubiso in aad isticmaalayso foomkii ugu dambeeyey ka hor inta aadan waxba u dirin. Haddii aad u dirto foom khalad ah waxaa dhici karta inaad wax walba dib u bilowdo!

## Ma xareysan karaa codsi aan ku bedelayo ama aan ku cuboonaysiinayo kaarkayga deganaanta?

Haa. Haddii aad tahay qof sharci **deganaansho rasmi ah** haysta waa aad bedeli kartaa kaarka (green card) kaa dhuma ama lagaa xado. Siddoo kale waxa aad cusboonaysiin kartaa kaararka dhaca. Tan samee, adigoo ka xareynaya Foomka I0-90 (Form I-90) hay'adda adeega Muhaajirka (USCIS). Kaarkaaga cusubi inta badan waxa uu ku yimaadaa boostada dhowr bilood gudahood. Laakiin marmarka qaarkood waxa ay qaadataa sannad ama ka badan.

Ka eeg hoos akhbaar khaash ah haddii aad tahay **degane shuruud leh**.

***Haddii wax dambi ah horey laguugu helay ka hel talo qareen khibrad u leh sharciyadda laanta socdaalka <u>ka hor</u> inta aadan xareysan foomka I-90 (Form I-90). Qaar kamid dambiyada la galaa waxa ay keeni karaan in lagaa qaado sharcigaaga deganaanshaha ah, iyo in lagaa masaafuriyo Mareykanka (U.S.).***

## Xaalado noocee ah ayaan u codsan karaa bedelida ama cusboonaysiinta kaarkayga deganaanta?



- kaarkaagu kaa dhumay, lagaa xaday, ama uu wax noqday
- aadan waligaa marna helin kaarkaaga deganaanta
- kaarkaaga la jarjaray, ama aan la akhriyi karin
- magacaagu isbedelay intii aad heshay kaarkaaga hore
- hay'ada laanta socdaalku ay wax khalad ku qortay kaarka (sida, ugu qorida magacaada si khalad ah kaarka, si khalad u qorida taariikhdaada dhalashada.)

- aad tahay qof sharci deganaansho leh, uuna kaarkaagu (green card) uu dhacayo ama uuba jaa dhacay. Haddii aad tahay qof leh **deganaansho shuruud leh** uuna kaarkaagu uu **dhacayo** 2 sanno ka dib waa **khasab inaad xareysato Foomka I-75 (Form I-751).** Eeg qaybta xigta.

- aad heshay kaarkaaga deganaanshaha ka hor intii aadan gaarin 14-sanno jir, aadna noqon doonto 14-jir, 30-cisho gudahood ama ka yar.

- Kaarkaaga degnaanta aysan ku qornayn waqti uu dhacayo

## Waxa aan ahay degane shuruudle ah. Ma inaad codsadaa inaan bedelo kaarkayga kolka uu dhaco?

**Haa, laakiin HA isticmaalin Foomka I-90**. Deganayaasha shuruudlaha ah waa khsasab inay codsadaan degnaansho rasmi ah kolka uu kaarkoodu dhaco. Wax yar ka hor inta aysan 2 daa sano dhamaan, waa khasab inaad codsato si looga 'qaado shuruudaha" deganaanshahaaga.

Waxa aad u baahan tahay inaad xareysato "Petition to Remove Conditions on Residence" (Form I-751) *(Codsiga Ka Qaadida Shuruudaha Sharciga Deganaanta).* Waxa aad u baahan tahay inaad xareysato **ka hor** inta uusan kaarkaagu dhicin. Hadii laanta socdaalku ay ansaxiso codsigaaga, waxaa aad heli kolkaa kaar deganaansho rasmi ah. Hadii kaarkaagu uu jaa dhacay, la xiriir qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka.

Deganayaasha shuruudaha leh waxa ay ku codsan karaan inay bedelaan kaararka dhumay, la xaday ama kharibma 2 dooda sanno gudahooda.

## Ma jiraan wax khatar ah oo ku saabsan xareysiga bedelida ama cusboonaysiinta kaarka (green card)?

**Haa.** Iyadoo qayb ka ah hawsha codsiga ayaa laanta socdaalku waxa ay kaa qaadi 'macluumaad shakhsiyan ah" sida faraha, iyo sawir. Hadii dambi horey aad u gashay uu diiwaanka kuugu jiro, waa ay soo bixi kolka aad doonayso inaad bedesho ama cusboonaysiiso kaarka.



Hadii laanta socdaalku ay qabto in dambiyadaadu ama dhibaatooyinka kale ay kaa dhigayaan qof la masaafurin karo, waxaa lagu galin karaa dadka saarida (tarxiilka) loo diyaarinayo. Waxaa aad waayi kartaa sharcigaaga deganaanta waana lagaa masaafurin karaa wadanka Mareykanka (U.S.)

**Xeerarka Adeega Laanta Socdaalka ee cusboonaysiinta ama bedelida kaararku (green card) si degdeg ah ayey isu bedeli doonaan. Hadii dambiyo hore lagugu helay ama horey laguu xiray, waa inaad ka heshaa talo dhanka sharciga ah qareen qaabilsan sharciyda laanta socdaalka (immigration) ka hor inta aadan xareysan codsi aad ku bedelayso ama ku cusboonaysiinayso kaarkaaga.**

**Waxa aan ku talagalsanahay inaan codsato inaan dhalashada qaato, ma u baahnahay inaad bedelo kaarkayga sharciga degnaanshaha ah?**
Maya. Haddii aad codsato inaad noqoto muwaadin Mareykan (U.S.) ah ka dib 12/12/22 adigoo xareysanaya foomka N-400 (form N-400), Laanta socdaalku waxa kordhisaa kaarkaaga dhacay mudadiisa 3 sanno. Uma baahnid inaad xareysato Foomka I-90 (Form I-90) haddii aad xareysatay Foomka N-400 (Form N-400) ee muwaadinimada. Waxa aad heli doontaa rashiidka xareysiga N-400 ah oo tilmaama 3 dan sanno oo kordhinta ah. Waxa aad u isticmaali kartaa rasiidka iyo kaarka dhacay siddii cadeyn aqoonso oo kale iyo awoodida inaad ku shaqeyso.

## Siddee ayaan u codsadaa bedelida kaarkayga deganaanta?

Waa inaad buuxisaa aadna saxiixdaa codsi, Foomka I-90- ee Codsiga Bedelida Kaarka Degananshaha Rasmiga ah. Waxaad kaloo aad ka heli kartaa foomka khadka (online) ka.

Ka hel shabakada adeega Muwaadinimada & Socdaalka ee Mareykanka (U.S.) [U.S. Citizenship & Immigration service (USCIS)] ee ah http://www.uscis.gov/i-90. Waxaa ku jira akhbaar badan bogga USCIS I-90. Waa ra'yi wacan inaad u wada akhrido si taxadar leh, khaasatan tilmaamaha. Hubi inaad dirto dhamaan dukumiintiyada ay khasabka tahay in lagu daro codsigaaga.

Hadii aad qorshaynaso inaad boostada dhigto, waxaa aad daabican kartaa foom banaan ama waxaa aad ka buuxin kartaa khadka (online) ka. Ka eeg hoosta qaybta "Form Details" *(Faahfaahinta Foomka)* ee bogga I-90. Mareegta (link) foomka iyo tilmaamaha ayaa halkaa ku jira.

Waxaad kaloo ka buuxin kartaa foomka kana xareyn kartaa khadka (online) ka ee la yiraa e-ku xareysi (e-filing) laakiin **hubi inaad si taxar leh aad u akhriso dhamaan akhbaarta oo dhan!** Waa ay dhib yihiin, dadka qaarkani kuma xareysan karaan khadka (online) ka. Tusaale ahaan: kama aad xareysan kartid khadka (online) ka haddii aad rabtid inaad isticmaasho khidmad ka saamixidaSi aad uga xareyso khadka (online) ka, riix ka "File Online" *(Xaree Khadka).*

Kolka aad dhamayso, hubi inaad **nuqul naftaada aad u daabacato** aadna meel dhigto.

# Foomka I-90

## QABTA 1. Akhbaar adiga kugu saabsan

**Ogow:** Ha buuxin santuukhyada kore ee ay ku qoran tahay "FOR USCIS USE ONLY" *(ISTICMAALKA HAY'ADA USCIS UUN)*

- Ku buuxi akhbaarta ay codsadaan – sida tirada-A (A-number) gaaga, (tiradaada laanta socdaalka), magaca, ciwaanka, taariikhda dhalashada, jinsiyada, lambarka Sooshal Sakuuratiga (Social Security), iwm.

- Ka taxadar marka aad ku buuxinayso ciwaanka warqadaha laguugu soo dirayo. Kani waa ciwaanka hay'ada USCIS ay kuugu soo dirayso kaarkaaga cusub. Hubi in ciwaankaagu uu sax yahay, sida, lambarka abaatamiintada, ziibkoodka, iwm. Sidoo kale, ugu soo sheeg ciwaan bedelida hay'ada USCIS foomka AR-11. Eeg warqadayda xogta aruursan *U soo*

[Sheegida Ciwaan Bedelida USCIS](). Hadii aad guurto ka hor inta aadan helin kaarkaaga, hubi inaad u sheegto ciwaan bedelidaada hay'ada USCIS iyo xafiiska boostada.

- "nooca ogolaanta" waa 2-xaraf, 1-lambar oo baaq ah oo kaarka ku dul yaal. Tusaale ahaan, "RE6." "maalinta ogolaanta" waa maalinta ku qoran kaarkaaga ee tiraa, "Degane Ilaa. "

- Hubi inaad buuxiso wax walba oo tilmaamtu tiraa waa loo baahan yahay.

- Hubi in ciwaankaaga warqadahu uu yahay mid la isku hayalan karo. Qaar ka mid shaqaalaha boostadu ma ay keenaan warqadaha hadii magaca boqshada ku qoran iyo magaca santuukha boostada ku qorani aysan is waafaqsanayn.

## QABTA 2. Nooca Codsiga

- #1 – Calaamada saxda ah saar santuukha quseeya xaaladaada.

hadii aad calaamadiso **1.a. Dagane Sharciyeysan oo rasmi ah** ama **1.b. Dagane Rasmi ah – Kumbuyuutarka** (taa macnaheedu waa waxa aad tahay dagane iminka ku nool dibada wadanka U.S) tag Qaybta 2, Waaxda A.

hadii aad calaamadiso **1.c. Dagane Shuruudle ah oo Rasmi ah**, ka bood Qaybta 2, Waaxda A kaliyana samee qaybta 2, Waaxda B.



- #2- **Sababta Codsiga.** Kaliya calaamadi uun hal santuukh oo ah qaybta A ama B.

## QABTA 3. Dhamaynta Akhbaarta

- Ku buuxi codsiga akhbaarta saxda ah.
  - Hadii aad joogtay Mareykanka (U.S.) markii aad codsatay aadna heshay kaarkaaga, Ku qor goobta xafiiska hay'ada USCIS ee ansaxisay codsigaaga laynka 1 iyo 2. Goobaha xafiisyadu waxa ay ku qoran yihiin rasiidkaaga iyo Ogaysiisyada Ansaxinta.

  - Hadii aad ka codsatay fiisaha muhaajirka safaarad ama qunsiliyad Mareykanku (U.S.) ku leeyahay wadanka aad u dhalatay, ku qor magacyada magaaladda iyo gobolka mareykanka (U.S.) ee aad ku nolaatay ka dib kolkii aad soo gashay mareykanka (U.S.) Laynka 3.a. Laynka 3.a.1, ku qor magaalada iyo gobolka fiisahaaga lagaaga dhuftay. Ama meeshii aad ka soo gashay Mareykanka (U.S.)

- Haddii waligaa laguu diiday, lagu masaafuriyey ama la amray in lagaa saaro wadanka Mareykanka (U.S.), la tasho qareen ama sharci yaqaan **ka hor** inta aadan ku calaamadin Haa santuukha laynka 4.

- Hadii aad waligaa saxiixday I-407 sheegaya inaad rabto inaad faraha ka qaado sharcigaaga deganaanshahaaga rasmiga ah, la hadal qareen ama sharci yaqaan ka hor inta aadan ku calaamadin santuukha Haa aadana xareysan codsigaaga.

- Kiisaska intooda badan, **ma aha** inaad la dirto dukumiintiyo asalka ah ama daliil foomka codsigaaga. Waxaa jira 2 waxyabood oo laga reebay arrintan:
    1. hadii kaarkaaga ay ku qoran tahay akhbaar khalad ah ayna khasab tahay inaad celiso kaarka codsigaaga, si aad u cadeyso in akhbaartu ay khalad tahay.

2. Hadii aadan marnaba helin kaarkaaga <u>aadna</u> haysato cadeyn ah inaadan marna helin, la soo dir cadeynta codsigaaga. Rugta la Xiriirida hay'adda USCIS (800) 375-5283 ayaa kuu sheegi karta haddii kaarkaaga lagu soo celiyey laanta socdaalka.

Hadii qaar ka mid ah dukumiitiyadaadu aysan ku qornayn Afka Ingiriiska, waa inaad ku soo dartaa turjumaad Afka Ingiriiska ah oo sugan.

- Dhamaystir akhbaarta #6-11 ee aqoonsiga shakhsiga ku saabsan



## QABTA 4. Maciinada loo fidiyo shakhsiyaadka Naafada ah iyo Iimaha leh

- Kaliya buuxi qaybtan hadii aad u baahan tahay caawimaad siyaado ah oo ku saabsan codsigaaga iyadoo sababtu tahay naafanimo ama iin.

## QABTA 5. Saxiixa

- Saxiixa taariikhdana iyo magacaagana ku qor. Ku buuxi lambarka telefankaaga.

## QABTA 6. Akhbaarta Turjubaanka

- Haddii aad isticmaashay turjubaan (calaamadi santuukha Qaybta 5, laynka 1.b), turjubaanku waa inuu ku buuxiyaa Qaybta 6 akhbaartiisa la soo xiriirida. Turjubaanku waa khasab inuu saxiixo warqada sugida ah.

## QABTA 7. Saxiixa qofka diyaarinaya foomka, hadii uu ka duwan yahay kuwa kore.

- Hadii uu qof kale kaa caawiyey buuxinta foomka, waxa uu u baahan yahay qofkaasi inuu ku qoro magaciisa iyo lambarka telefankiisa halkan. Kolkaa waxay u baahan yihiin inay saxiixaan taariiikhdana ku qoraan foomka.

## QABTA 8. Bogga Sharaxaada

- tani waxaa loogu talagalay inaad ku bixiso faahfaahino dheeraad ah hadii aad u baahato inaad sharaxdo waxyaabo ku saabsan mid walba oo ka mid ah jawaabahaaga. Hubi inaad buuxiso Bogga, Qaybta, akhbaarta shayga si kolkaa laanta socdaalku ay u ogaato waxa aad ka hadlayso.

## Bixinta Lacagta

Dadka intiisan badan waa inay bixiyaan khidmad xareyn ah (aan ka ahayn inay isticmaali karaan khadmad saamixid). Khidmadaha xareysiga dadka intiisa badan waa $465 [ama $415 khadmadda ka xareynta khadka (online) ah]. Marmar badan sidoo kale waa inaad bixiso khidmada macluumaad shakhsiyanka ah oo ah $85 ama wadar ahaan $550.

Akhbaarta sugan ee ku saabsan cadadyada khidmadaha, gal oo ka eeg shabakada ah, www.uscis.gov/i-90 ka dibna riix qaybta "Filing Fee" *(Khidmada Xareysiga).*

Qaybta "Filing Fee" sidoo kale waxa ay leedahay akhbaar ah siyaabaha kala duwa ee aad ku bixin kartid.

## Lacagta qof walba ma inuu bixiyaa?



Kiisaska qaarkood, hay'ada USCIS waxa ay kuu ogolaantaa inaad xareysayo codsi adigoon bixin khidmada. **Ma aha inaad bixiso hadii:**

- Aad u xareynayso codsigan sabab ah in kaarkaaga wax khalad ahi ay ku qoran yihiin khaladkaana ay sameysay hay'ada laanta socdaalka, **ama**
- In uusan marnaba aadan helin kaarkaagii deganaanta ee asalka ahaa **iyo** boostada oo ku celisay kaarka laanta socdaalka. Hadii kaarku uusan marna aan iyaga lagu celin, waa inaad bixiso khidmada xareysiga.

  Si aad u ogaato in kaarkaagii lagu celiyey laanta socdaalka iyo in kale, booqo shabakada www.uscis.gov. Geli lambarka rasiidkaaga santuukha qaybta "eeg xaalada kiiska" ("check case status.") lambarka rasiidku waxa uu kaga qoran yahay rasiidka ogaysiiskaaga santuukha kore. Hadii shabakadu (website) aysan kuu sheegin in kaarka la soo celiyey iyo in kale, waxaa dhici karta inaad u baahato inaad balan ka sameysato xafiiska laanta socdaalka ee deegaankaaga. Si aad balan u sameysato, ka wac Xarunta Wicitaanka ee USCIS khadka ah (800) 375-5283 **ama**

- Hadii aad u xareysanayso codsiga waayo waxa aad noqon dhawaan 14 sanno jir, kaarkaaguna waxa uu dhacayaa ka dib kolka aad 16 sanno jirsato, kolkaa khidmada codsigaaga waa lagaa saamixi hadii aad ku xareysato 30-cisho gudahood 14-sanno jirsigaaga. Laakiin wali waa inaad soo dirtaa $85 ee khidmada macluumaad shakhsiyanka ah.

  Hadii aad 14-sanno jir aan noqonayso dhawaan kaarkaaguna uu dhacayo ka hor inta aadan gaarin 16-sanno, waa inaad bixisaa khidmada oo buuxda $550.

Marmarka qaarkood, waa aad heli kartaa in lagaa saamaxo khidmad si kolkaa aadan u bixin. Waxa aad u baahan tahay inaad codsato khidmad ka saamixid adigoo isticmaalaya **Foomka I-912** ee hay'ada USCIS **"Codsiga Saamixida Khidmada."**


**ARRIN MUHIIM AH:** Hay'ada USCIS ma ay bilaabi doonto qabashada hawsha codsigaaga ilaa inta ay ka helayso lacagta ama ay kaa siinayso khidmad ka saamixid. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Saamixida Khidmadaha Laanta Socdaalka.*

## Xareysiga Codsigaaga

**Hadii aad ka xareysanayso khadka (online):** Hay'adda USCIS waxa ay ku haysaa tilmaamo barteeda shabakada ku saabsan sidda looga sameysto akoon. Dukumiintiyadaada gargaaraya (cadeyn) halkaa ayaa kolkaa la soo gelin (uploaded) doonaa.

**Hadii aad boosto soo dhigid aad ku xareysanayso:** Soo dir codsiga asalka ah iyo nuqulada dukumiintiyada gargaaraya. Kala har nuqul **wax walba** si aad u haysato. Ka hor inta aadan soo dirin codsiga hubi in wax walbaa ay ku jiraan:

- ☐ Foomka I-90 (Form I-90)
- ☐ nuqulada cadeyntaada
- ☐ wixii lacag ah ama codsi khidmad ka saamixid ah




Ugu soo hagaaji laanta socdaalka (immigration), ciwaanadaa:

Si aad boostadda ugu dhigto adigoo isticmaalaya
Xafiiska Boostada US [US Post Office (USPS)]
USCIS
Attn: I-90
P.O. Box 21262
Phoenix, AZ 85036

Si aad boostadda ugu dhigto adigoo isticmaalaya FedEx, UPS, iyo DHL
USCIS Attn: I-90 (PO Box 21262)
2108 E. Elliot Rd.
Tempe, AZ 85284-1806

## Macluumaadka Shakhsiyanka ah

Ka dib kolka aad boostada soo dhigto codsigaaga, laanta socdaalku waxa ay balan kaaga qabataa adiga Rugta Gargaarka Codsiyda (ASC). Waxa ay kuu soo diri ogaysiis kuu sheegaya adiga marka iyo meesha ay balantaadu tahay. **Tag balantaada faro qaadida iyo macluumaadka shakhsiyanka ah!**

Waxaad u baahan tahay inaad la timaado:

- ogaysiiska balantaada
- kaarka deganaanta ee asalka ah (hadii aad haysato)
- Aqoonsiyo (ID) kale oo sawir leh oo dowladi bixisay
- Nuqulo asalka ah ama sugan ee magac bedelida hadii aad magacaaga bedeshay
- Ogaysiiska ansaxinta kaarka degnaanshahaaga
- Nuqulo sugan oo ah qoraalo bilays ama maxkamadeed oo ah wixii xiritaan ah ee aad la kulantay wixii ka dambeeyey kolkii kaarkaaga degaanshaha ee asalka ah lagu siiyey. Laakiin ka taxadar arrintaa! La tasho qareen qaabilsan laanta socdaalka marka hore hadii ay jiraan wax xirid ah, tigidhyo ama dambi ku helid ah.

**Hadii aad sheeganayso in kaarkaagii (LPR) lagaa xaday,** la imow, warbixinta bilayska ee aad xareysay si aad u sheegto dambiga.

**Hadii wax ka mid ah dukumiintiyadaadu aysan ku qornayn Afka Ingiriiska**,waa khasab inaad la timaado iyadoo Ingiriis loo turjumay oo sugan.



Balantaada, faro, sawir iyo macluumaad kale oo shakhsiyan ah ayaa lagaaga qaadi doonaa. Laanta socdaalku waxaa dhici karta inay kaa qaado kaarkaaga dhacaya ama aan saxda ahayn.

**Hadii aad tagi waydo balanta faraha iyo macluumaadka kale la isaga qaadayo, laanta socdaalku ma dhamayn doonto hawsha codsigaaga, amana aad heli doontid kaarkaaga. Codsigaaga waa la diidi hadii aadan balantaa tagin.**

***Xasuusnow:*** *Hadii aad dambiyo horey loogugu helay ama lagu xiray waa inaad ka heshaa talo dhanka sharciga ah qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka ka hor inta aadan xareysan codsigan. Qaar ka mid dambiyada la galaa waxa ay keeni karaan in lagaa qaado sharcigaaga deganaanshaha ah, iyo in lagaa masaafuriyo Mareykanka (U.S.)*

## Hel cadeyn ah inaad sharci leedahay inta aad sugayso kaarkaaga cusub

Waxaa dhici karta inay qaadato sannad ama ka badan in kaarkaaga cusub uu kuu soo dhaco. Hadii aad u baahan tahay cadeyn ah inaad sharci degaansho rasmi ah aad leedahay, xataa hadii aadan haysan kaarkaaga, waxaa dhici karta inaad:

1. U tusto kaarkaaga dhacay ee wata rasiidka I-90 aad xareysay siddii cadeyn oo kale ah in kaarkaagu uu shaqeynayo 36 bilood laga bilaabo taariikhda dhicitaanka. Waxa aad xaq u leedahay inaad ku shaqeyso aadna ku safri karto dukumiintiyadaa.

2. Hesho in lagu dhufto Shaabada I-551 dal-ku galkaaga (passport) ajnabi ee aan wali dhacin ee hada taa oo cadeynaysa inaad sharci deganaansho rasmi ah aad leedahay. Siddoo kale la yiraa “Fanagaboolada“ADIT.” Haddii aad u baahan tahay shaabadan, ka wac Xarunta Wicitaanka ee USCIS khadka ah (800) 375-5283 si aad balan uga qabsato.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**